



ParentsNext
AN AUSTRALIAN GOVERNMENT INITIATIVE

Ku soo dhowoow ParentsNext



Isu-dheelitirka ujeedooyinka qoyskaaga, waxbarashadaada iyo shaqadaada

Waxaa jira faa'iidooyin badan oo ay leeyihiin ka qaybgalka ParentsNext. **La taliyaha ParentsNext ayaa kula shaqeynaya** si uu kaaga caawiyo inaad dhiso kalsoonidaada, oo aad horumarisid xirfadaada oo aad heshid adeegyada iyo taageerada kuu dhow si aad u qorsheysid mustaqbalkaaga.

Uma baahnid inaad shaqo raadisid intaad ku jirtid barnaamijka. Laakiinse haddii aad diyaar tahay oo aad dooneysid inaad shaqo raadisid, **la taliyahaaga ayaa ku caawin kara.**

Saa daraadeed intaad waxbaranaysid ama shaqeynaysid waxaa laga yaabaa inay kuula muuqato wax aad u fog hadda, ka qaybqaadashada ParentsNext waxay ku geynaysaa meel aad uga fiican oo aad fursadaha ku qaadan karto **marka wakhtigu sax yahay.**



Siduu u shaqeeyo ParentsNext

Waxaa jira afar waxyaalood oo ugu waaweyn oo lagu weydiin doono inaad sameysid barnaamijka ParentsNext si aad u sii qaadatid Lacagta Waalidka.



1. Immow ballamaha

Ballamahaaga ParentsNext waxay badanaa noqon doonaan **qof ahaan hal mar saddexdii biloodba**.

La taliyahaaga ayaa ku dhageysan doona oo kaa caawin doona inaad go'aansatid **waxaad dooneysid inaad gaarto**. Waxay sidoo kale kaa caawinayaan inaad qorsheyso talaabooyinkaaga ku xigga.



2. Dooro waxqa- badkaaga

La taliyahaaga ayaa ku caawin doona inaad doorato waxqabadkaaga **kaa caawin doona** inaad shaqo isu diyaarisid.

Waxqabadkan waa inuu ku haboon yahay nololsha qoyskaaga waana inuu khuseeyaa **waxaad dooneystid inaad gaarto**.



Inta aanan imman ParentsNext run ahaantii ma lahayn ujeedo ama qorshe ah waxaan rabay inaan sameeyo... ujeedkayga ugu weyn wuxuu ahaa in aan dhammeeyo koorsadeyda ganacsiga iyo in aan ka furto dukaanka ciddiyaha gurigeyga oo halkaas ka sii socdo."

Patrice, waalidka ParentsNext



3. Samee oo ogolow Qorshe

La taliyahaaga ParentsNext ayaa kaa caawin doona sameynta **Qorshaha ka Qaybgalka**.

Qorshahani wuxuu sharxayaa waxqabadka, ka soo warbixinta iyo ballamaha **aad ogolaato inaad sameyso**.



“ParentsNext waxay iga caawiyeen in aan kuleejada aado si aan u dhammeeyo fasalkii 11 iyo 12. Koleejada dugsiiga sare waxaa loo sameeyey tahsiilaadka xannaanada carruurta oo bilaash ah saa daraadeed waan ogaa inay carruurteydu la heynayo intaan fasalka ku jiro – tani waxay keentay ka duwanaan weyn!”

Ashleigh, waalidka ParentsNext



4. Ka soo warbixinta

Labadii toddobaadba waa inaad Centrelink u soo warbixisaa.

La taliyahaaga ayaa kuu sheegi doona haddii sidoo kale u baahan tahay inaad **u soo warbixisid ParentsNext**.

La taliyahaaga ayaa kuu sheegi doona sidii iyo goortaad soo warbixineyso.

Wixii macluumaad dheeraad ah gal www.employment.gov.au/parentsnext

Si aad ah uga faa'iideysiga ParentsNext

Haddii aad u baahan tahay caawimaad intaa ka sii badan



Xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta **waxaa jiri karta wax badan oo noloshooda heysta.** Fadlan la hadal la taliyahaaga ParentsNext haddii aad xannuunsaneysid ama guriga dhib kaa heysto. **Taageero waa la helayaa** waxaadna weydiisan kartaa inaad nasasho ka qaadatid qorshahaaga haddii aad u baahan tahay.

Cabasho sameynta ama bedelida la taliyayaasha



Waxaad kala hadli kartaa la taliyahaaga wax ku saabsan wixii dhibaato ah ee laga yaabo inaad ku qabto ParentsNext. Haddii aadan degenayn la hadlida la taliyahaaga fadlan wac Khadka Adeegga Macmiilka Qaranka **1800 805 260** (oo bilaash u ah taleefanada caadiga ah) ama ka buuxi **foomka Complaints, Compliments and Suggestions** bogga ParentsNext.

Ku dheganaanta qorshahaaga

Si aad u sii qaadatid Lacagta Waalidka aad ayey muhiim u tahay **inaad timaadid ballamaha, samee waxqabadkaad ogolaatay** kana soo warbixi horumarkaaga. Haddii wax dhacaan oo aadan iman karin ama wakhtigii la rabay soo warbixin karin **u sheeg la taliyahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah** si aad isaga ilaalisid in lacagtaada la hakiyo.

